Sida loo buuxiyo Codsigaaga Deeqda Waxbarasho

Meertada deeqda waxbarasho ee sannadlaha ah waa Xagaaga ilaa dhammaadka sanad-dugsiyeedka ku saleysan Kalandaariyaha Iskuullada Dadweynaha Seattle.

Tallaabada 1: **Macluumaadka Ka-qaybqaataha iyo Dhammaan Xubnaha Qoyska/Guriga oo ay ku jiraan ku-tiirsanayaasha oo dhan**

- Qor liiska **DHAMMAAN** magacyada, taariikhda dhalashada, jinsiga iyo qowmiyadda xubnaha qoyska/guriga

Tallaabada 2: **Xaqiijinta Dakhliga Qoyska/Guriga iyo U-qalmitaanka Ku-tiirsanaanta**

- Buuxi wadarta guud ee dakhliga ka-dibna calaamadee sanduuqa dakhliga *billaha* ama *sannadlaha*
- **Ku soo lifaaq caddeynta dakhliga** ee **dhammaan** dadka waaweyn (18 sano iyo ka weyn) iyo **caddeynta ku-tiirsanayaasha**
  - Canshuur celinta dakhliga ee 1040 saxiixan (sanadkan ah) oo qoraya liiska dhammaan xubnaha guriga iyo ku-tiirsanayaasha ayaa ah xaqiijinta dakhliga ee la doorbido waxayna yareynaysaa dib-u-dhacyada ku yimaada socodsiinta hawlaha codsigaaga
  - Haddii ku-tiirsanayaashaada aanan liiskooda lagu qorin 1040, ku soo lifaaq nuqulka warqadahooda dhalashada

OGOW:*Waa in aad xareysaa Canshuur Celinta Dakhliga 1040 ee sannadlaha ah haddii dakhliga sannadlaha gurigaaga/qoyskaga uu yahay $13,500 ama ka badan.*

Dokumentiga Kale oo laga yaabo in loo tixgeliyo **xaqiijinta dakhliga iyo ku-tiirsanayaasha**, haddii Canshuur Celinta Federaalka 1040 AANAN la xareyn:

- ***U-qalmitaanka barnaamijka Qiimo-dhimista Adeegyada Korontada, Biyaha iyo Gaaska ee Magaalada Seattle –*** Ku soo lifaaq nuqulka bayaanka - korontada, biyaha iyo gaaska waxaanna la dabakhi doonaa deeq waxbarasho 50%.**OGOW:**Warqadaha Dhalashada ee dhammaan ku-tiirsanayaasha qoran waa in ay la socdaan codsiga.
- ***Dokumentiga Dheefaha Damaannada Bulshada***waa la aqbali doonaa.(SSI ama SSA-1099), HADDII Damaannada Bulshadu ay tahay nooca kaliya ee dakhliga ku soo gala. Haddii dakhli kale la oggaado: lacagaha hawlgabka, masaruufka, dakhliga ganacsi, iwm., Canshuur celinta Dakhliga 1040 waa in sidoo kale la soo gudbiyaa.
- ***Xaqiijinta Ardeyga ee Waqtiga-buuxa.***Jadwalka Fasalka, Warqadda Shaqada Gargaarka Maaliyadeed iyo dokumentiyada loogu talogalay dakhli kastoo kale waa in lagu lifaaqo si ay uga turjumaan xaaladda dakhliga ee qofka weyn ee ku qoran liiska codsiga.
- ***Gunta jeegga mushaarka canshuurta ka hor ee Hal (1) Bil*** ee loogu talogalay dhammaan xubnaha guriga/qoyska ee liiska ku qoran- 18sano iyo ka weyn***:*****OGOW:**Warqadaha Dhalashada ee dhammaan ku-tiirsanayaasha qoran waa in lagu soo lifaaqo codsiga.
- ***Barnaamijyada Gargaarka Dadweynaha:***
  - ***Gargaarka Ku-meelgaarka ah ee Qoysaska Baahan (TANF)*** Ku lifaaq dokumentiyada qoraya liiska xubnaha qoyska/guriga ama ku lifaaq Warqadaha Dhalashada ee dhammaan ku-tiirsanayaasha liiska ku qoran
  - ***Dakhliga Damaannada Bulshada ee Naafonimada (SSI)***
  - ***Maamulka Naafonimada Koritaanka (DDA)***

Tallaabada 3: **Macluumaadka Ka-qeybgalaha**

- Buuxi Xiriirka Ugu Weyn – Macluumaadka Qofka Weyn ee ah Madaxa Guriga

Tallaabada 3A: Ma waxaad codsanaysaa **Daryeelka Dugsiga Barbaarinta ama Daryeelka Carruurta Jirta Da'dii Iskuulka ee Shatiyeysan?**

- Buuxi Bogga 2 (dhanka gadaale) ee codsiga deeqda waxbarasho

OGOW*:Qaybtan ee codsiga MA AHA mid loogu talogalay Waxqabad ama Xeryaha Kobcinta* FADLAN kaliya codso barnaamijyada cunugaaga (carruurtaada) uu qorsheynayo in uu ka qaybgalo.Waxaa jirta shuruud imaansho iyo shuruuc kale ee deeqda waxbarasho ee lagu qeexay dhanka gadaale.

Tallaabada 4: **U soo-gudbi codsiga buuxa oo ay la socdaan xaqiijinta dakhliga iyo dokumentiyada ku-tiirsanayaasha shaqaalaha xarunta Beeraha iyo meelaha madadaalada ee Seattle.**

- Codsiga wax ka dhiman wuxuu **dib-u-dhigi doonaa** socodsiinta hawsha codisgaaga.

Siyaasadaha, doorarka iyo Isla-xisaabtanka iyo mas'uuliyadaha deeqda waxbarasho ee Dugsiga Barbaarinta iyo daryeelka carruurta Jirta Da'dii Iskuulka

Waaxda Beeraha iyo Meelaha Madadaalada ee Magaalada Seattle (SPR) oo kaashaneysa Gollaha Madadaalada ee La Xiriira (ARC) wuxuu maamulaa gargaarka deeqda waxbarasho ee la siiyo qoysaska ka soo baxa dhabbetuseyaasheenna dakhliga Waaxda Beeraha iyo Meelaha Madadaalada ee Seattle.

- Abaalmarinada deeqda waxbarasho waxaa loo sameeyaa qaab ku saleysan in loo adeeggo, qofka ugu hor imaada inta maaliyadaha la heli karo.

- Abaalmarinta deeqda waxbarasho si otomaatik ah **KUUGUMA** qoreyso barnaamijka aad doonayso, mana ku siinayso mudnaan.Waa in aad si toos ah isaga diiwaangeliso xarunta bulshada ee barnaamij kasta waana in aad raacdo dhabbetusayaashooda diiwaangelinta.

- Diiwaangelinta **LAMA DAMAANNAD-QAADIN** waxayna ku saleysan tahay booska la heli karo.

- Waxaad mas'uul ka tahay bixinta ujuurrada diiwaangelinta ee aan la isu-celin iyo baaqiga kharajka barnaamijka ee loo baahan yahay si boos loogu xajiyo diiwaangelinta cunugaaga(carruurtaada).

- Deeqaha waxbarasho ee daryeelka carruurta jirta da'da iskuulka waxaa kaliya loo bixiyaa isqoritaanka Waqtiga Buuxa (5 maalmood toddobaadkii).Deeqaha waxbarasho LOOMA maalgeliyo isqoritaannada toddobaadka ee qayb ahaanta ah.

- Cunugaaga(carruurtaada) waxaa **laga doonayaa in ay ka-qeybgalaan ugu yaraan 60% maalmaha barnaamijka si aad u haysato maalgelinta deeqdaada waxbarasho**.Haddii sabab kasta cunugaaga (carruurtaada) uga bixi karin ka-qeybgalka ugu yar ee 60% ee loo baahan yahay, fadlan si degdeg ah u ogeysii xaruntaada bulshada.
    - Haddii cunugaaga uu hoos ugu dhaco ka-qeybgalka loo baahan yahay waxaa la gelin doonaa muddo tijaabin ah.Dhicitaanka labaad ee ka-qeybgalka hoose waxay keeni kartaa in meesha laga saaro qoondadaada deeqda waxbarasho.

- Haddii sabab kasta aad u doonayso in aad baajiso dhammaan ama qeyb kasta ee qoondada deeqdaada waxbarasho, waa mas'uuliyadaada in aad buuxiso foomka **“Ogeysiiska Drop”** ugu yaraan laba (2) toddobaad ka hor taariikhda barnaamijka.Hadaad ka gaabiso in aad bixiso ogeysiiska in aadan isticmaaleyn qoondada deeqda waxbarasho waxay keeni kartaa tijaabin ama in meesha laga saaro qoondada deeqda waxbarasho.Foomka waxaa loogu soo lifaaqay dib-u-eegista iyo isticmaalkaaga, haddii ay suuragal tahay.Foomamka **Ogeysiiska Drop** ayaa laga heli karaa xaruntaada Beeraha iyo Meelaha Madadaalada ee Seattle.

- Abaalmarintaada deeqda waxbarasho si degdeg ah ayay isu beddeli kartaa haddii wakhti kasta ay isbeddelo ka jiraan dakhliga ama tirada dadka reerkaaga.Waa in aad xafiiska deeqda waxbarasho siisaa dokumentiyada ku qoran isbeddelo kasta.